



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

QARAAR GOLAHA SHACABKA

KU SAABSAN

**WARBIXINTA DAKHLIGA IYO KHARASHKA
DOWLADDA EE BILAHA JANAAYO ILAA MAAJO 2015.**

GOLAHA SHACABKU:

- Markuu Arkay:** Qodobka 69aad Faqradiisa 2aad (b) ee Dastuurka J.F.S.
- Markuu Arkay:** Tala soo jeedinta Guddiga Maaliyadda iyo Qorshaynta Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya Lambar GM&Q/BFS/125/2015 ee 25/07/2015, kuna saabsan warbixinta dakhliga iyo kharashka Dowladda ee bilaha Janaayo - Maajo 2015 iyo arrimaha la xiriira.
- Markuu Arkay:** Warbixinta Hantidhowrka Guud ee Qaranka ee ku saabsan isla arrinta dakhliga iyo kharashka Dowladda ee bilaha Janaayo - Maajo 2015.
- Markuu Garwaaqsaday:** In ay jiraan khaladaad ka dhacay maamulka dakhliga iyo kharashka dowladda sannadihii 2013, 2014 iyo 2015.
- Markuu Ogaaday:** Baahida loo qabo in sixitaan buuxa iyo dabagal lagu sameeyo khaladaadka ka dhacay maamulka hantida dowladda ee sannadaha kor ku xusan.

Kalfadhiga 7aad fadhigiisii 14aad ee 28^{ka} Nofeembar 2015, wuxuu ku go'aansaday **Qaraarkan.**

A. DAKHLIGA

Qodobka 1aad:


Goluhu wuxuu Xukuumadda farayaa in ay cashuuraha iyo adeegga ku waajibey ka qaaddo Shirkadaha Isgaarsiinta, Xaawaladaha, Warshadaha, Hoteellada iyo Shirkadaha kale ee Ganacsiga si waafaqsan shuruucda maaliyadda dalka.

Qodobka 2aad:

Waxaa Wasaaradda Maaliyadda la farayaa in Cashuurta Berriga si rasmi ah loo qaado, loona sameeyo habraac sharci ah, xukuumadduna waa in ay xaqiijiso in la helo awood dowladeed oo fulisa hawshaas.

Qodobka 3aad:

Iyadoo la cuskanaayo Sharciga Shaqaalaha Ajnabiga ah ee uu Baarlamaanku ansixiyey, Goluhu wuxuu Xukuumadda farayaa in shirkadaha shisheeye iyo shaqaalahooda ku sugan xarunta Xalane iyo meelaha kale ee dalka ka mid ah ee aan haysan xasaanad diblomaasiyadeed laga qaado cashuurta ku waajibtay, sharcigana la waafajiyo qaabka ay dalka ku soo galayaan.



Qodobka 4aad:

In Shirkadaha ka hawlgala Dekedda Xamar iyo Gegida Diyaaradaha Aaden Cadde heshiisyadii hawsha loogu dhiibay dib-u-eegis lagu sameeyo, lana horkeeno Baarlamaanka muddo 15 (Toban iyo Shan) cisho gudahooda, si loo waafajiyo Qaraarkii uu hore Golaha Shacabka uga gaaray.

Qodobka 5aad:

In Xukuumaddu geyso Saraakiil Soomaaliyeed oo dowladda ka wakiil ah dhammaan Shirkadaha dakhliga qabta ee ay dowladdu qaybta ku leedahay oo ay ku jiraan kuwa ka hawlgala Dekedda Xamar iyo Garoonka Aaden Cadde, lacagaha ay qaadaanna lagu qabto buugaagta lacag-qabashada ee ka diiwaan gashan Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowladda.

Qodobka 6aad:

In lagu dhaqmo tacriifooyinka u degsan cashuuraha furdadaha iyo berriga ee dalka.

Qodobka 7aad:

In Xukuumaddu tallaabo degdeg ah ka qaaddo mideynta tacriifooyinka iyo cashuuraha ee dhammaan dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, si looga hortago kala duwanaanshaha cashuuraha badeecadaha laga soo dejiyo ama laga dhoofiyo dalka.

Qodobka 8aad:

In dib-u-eegis lagu sameeyo dhammaan heshiisyada lagu kireeyey hantida dowladda, lagana diiwaangeliyo Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Qaranka, dakhligoodana lagu soo xareeyo khasnadda dowladda, iyadoo hawshaasi lagu fulinaayo muddo soddon (30) cisho gudahood ah kana bilaabata maalinta uu qaraarkan soo baxay.

Qodobka 9aad:

In ay xukuumaddu sida ugu dhaqsiiyaha badan Maamul-goboleedyada xal ugala gaarto, kana soo saarto xeer ku wajahan saami qaybsiga cashuuraha iyo waxyaabaha kale ee hadda suurta galka ah ee dowladda federalku xuquuq ku leedahay.

Qodobka 10aad:

In dakhliga ay qabtaan Wasaaradaha, Hay'adaha dowladda iyo Safaaradaha lagu qabto buugaagta lacag-qabashada ee ka diiwaangashan Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee dowladda, laguna soo xareeyo khasnadda dowladda waqtiga ku habboon.



B. KHARASHKA

Qodobka 11aad:

Xeerka Qoondada ee lagu soo saaro Miisaaniyadda sannad laha waa nidaamka sharci ah oo aan lagu xadgudbi karin, waxaa la farayaa Wasaaradda Maaliyadda iyo Hantidhowraha Guud ee Qaranka in ay si rasmi oo jooqta ah ugu dhaqmaan Xeerka Qoondaha Miisaaniyadda, iyadoo aan laga tallaabsan mudnaanaha iyo habraaca uu tilmaayo.

Qodobka 12aad:

Madaxa Keydka kabista ee Miisaaniyadda, waxaa loogu tala gala xaaladaha degdeg ah (*Emergency Cases*) ee la soo gudboonaada qaranka. Golaha wuxuu ku talinayaa in hadda wixii ka dambeeya Madax-xigahan loo isticmaalo wixii loogu talagalay oo keliya.

Qodobka 13aad:

Go'aankii Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee uu qaraar kan ka soo saaray waxaa lagu caddeeyey in kharashka ku baxa safarrada dowladda uu aad u badanyahay, uuna dhibaato ku yahay xaaladda dhaqaale ee dalkeennu waqtigan ku suganyahay.

Sidaa awgeed, Golaha Shacabku wuxuu Xukuumadda farayaa in kharashka safarrada ay dowladdu galeyso uu ku koobnaado keliya mid qaranka dhaqaale ku soo kordhinaaya ama muhiimad siyaasadeed leh.

Qodobka 14aad:

In Xukuumaddu ka soo saarto Xeer lagu saleeyo Gunno xileedka Siyaasiyiinta Qaranka iyo Sahaysafarta (*DSA*).

Qodobka 15aad:

Si loo xoojiyo daahfurnaanta xisaabaadka qaranka, in dhammaan hawlaha qandaraasyada iyo libka ee dowladda iyo laamaheeda ay maraan nidaamka sharciga ee habraaca libka iyo Qandaraasyada (*Tender and Procurement procedure*).

Qodobka 16aad:

Xeer-Ilaaliyaha Guud, wuxuu hore u soo caddeeyey 19 Wasaaradood oo lunsaday dhaqaale caddeyna ka hayo, taasoo uu ka horjeediyey kulanka guud ee Baarlamaanka.



Goluhu wuxuu Xeer-ilaaliyaha Guud Qaranka farayaa inuu kiisaska 19kaas Wasaaradood ka qaado tallaabada sharci ee ku habboon muddo 30 (soddon) maalmood gudahooda ah, oo ka bilaabata maalinta Qaraarkan soo baxay.

Qodobka 17aad:

Goluhu wuxuu Xukuumadda farayaa in dhammaan heshiisyada ay Dowladdu la gasho dhinacyada kala duwan laga diiwaangeliyo Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Qaranka, heshiiskii aan laga diiwaangelin Xafiiska Hantidhowrka waxaa loo aqoonsanayaa mid aan sharci ahayn.

Qodobka 18aad:

Waqtigii Ansixinta Xisaab xirkii Miisaaniyaddii 2013ka Guddiga Maaliyadda wuxuu Baarlamanka hor keenay warbixinta lacag dhan \$500,000 (Shan boqol kun) Dollar oo la lunsadey sida ku cad warbixinta Wasiiraddii hore ee Arrimaha Dibadda, lacagtaas oo ahayd qayb ka mid ah \$1,000,000 (Hal Malyan) Doolar oo ay Dowladda Shiinuhu ugu deeqday Soomaaliya lana soo marsiiyey Safaaradda Soomaaliya u fadhida dalka Kenya, lacagtaas \$500,000 (Shan boqol kun) Doolar oo ka mid ah laguma shubin khasnadda dowladda.

Hantidhowraha Guud ee Qaranka waxaa la farayaa inuu kiiskaas si degdeg ah ugu gudbiyo Xeer-ilaalinta Qaranka sida ugu degdegsan, si tallaabada ku habboon looga qaado.

Qodobka 19aad:

Guddiga Maaliyadda iyo Qorsheynta ee Baarlamaanka waxay warbixintooda halkan ku lifaaqan ku soo caddeeyeen lacag dhan \$4,000,000 (Afar Malyuun) oo la waayey, taasoo ka mid ahayd \$10,000,000 (Toban Malyuun) Dollar, oo ay Dowladdu ka amaahatay Shirkadaha Dahabshiil iyo Salaam Bank, hase yeeshee 6 (liix) Malyan oo keliya lagu soo shubay khasnadda Dowladda 4 (Afar) Malyan ee hartayna aan la aqoon meel ay martay.

Goluhu wuxuu Hantidhowrka Guud farayaa inuu kiiskan cidda ku lug leh soo caddeeyo, degdegna ugu gudbiyo Xeer-ilaalinta si sharciga loo horgeeyo.

Qodobka 20aad:

Sida ku cad Qodobka 56aad ee Xeer-nidaamka Xisaabaadka Dowladda NO 317 ee soo baxay 17/12/1962, awoodda lacagbixinta F.16 (Expenditure warrant) walba oo



Xisaabiyaha Guud lacag ku bixinaayo waa inuu saxiixaa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda kharashka soo dalbatay.

Sidaa darteed Kharashyada ku baxa Ciidamada qalabka sida waa inuu fowjarkooda F.16 saxiixaa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda ay hoos tagaan, bilkastana soo gudbiyaan Xisaab celin. Taliskii aan Xisaabcelin keenin waa in laga fiirsadaa in kharash cusub loo sii daayo.

Qodobka 21aad:

Goluhu wuxuu Hantidhowraha Guud ee Qaranka farayaa inuu dabagal iyo kormeer joogta ah ku sameeyo sida loo dhaqan galiyey qodobada qaraarkan, warbixin joogta ahna ka soo siiyo Golaha.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

